



# Baaq Caawinaad Akhriska iyo Qoraalka: Ilmo walba waxey u baahanyihiin codeyn

(Tips to Support Reading and Writing: Every Child Needs a Voice—Somali version)

Xiriirku waa barasho soconeysa qofku intuu noolyahay, oo bilaabata dhalaanka. Dhegeysiga iyo hadalka waa qeyb muhiim u ah waxbarashada. Ilmaha dib-udhaca xooggan leh, waxa laga yabaa in hadalku yara dhibayo, ama eysan hadli karin. Xitaa haduu qoyskaadu fahmayo ilmahaada dhawaaqooda iyo waxa ay ula jedaan, ama jir dhaqaaqooda, waa muhiim in la helo hab ilmahaagu ku baran karaan kelmadaha ka caawini kara in ay bartaan xirfadaha akhriska qoraalka iyo la xiriirka dadka kale ee aan qoyska aheyn.

## 1. Qadari qalabka caawinaadda

Qalabka xiriirka hadalka dadka ka caawiya waxa loo yaqaan Augmentative Alternative Communication, ama marka la soo gaabiya AAC. Waa qalab inta badan qofka siinaya cod. Waxuu noqon kara mid isticmaalkiisu sahlan yahay ama adagyahay, lakiin mowqifku waa in ilmahu ku bartaan xirfadada hadal-xiriirka, waxaana jira nuucyo badan oo diyaar u ah ilmaha. Qalabkani waxuu noqon kara mid sahlan oo leh sawiro tilmaan bixin ah, ama mid beteri ku shaqeeya, oo lagu duubi karo fariin, dabadeedna dib loo dhageysan karo. Qalabka qaarkood waxuu noqon kara mid aad u adag oo ilmaha siinaya doorasho balaaran oo jumlada ah.

## 2. U door qalabka hadal-xiriirka

Waxaa laga yabaa in aad horey u maqashay fikradda ah; intaan ilmaha loo qadiriin qalabka hadal xiriirka, waa in ay garanayan xumaan iyo samaan, ama leyihiin xirfad ay ku hantaan qalabka. Lakiin waxa baaris lagu ogaaday, in ilmahu isticmaalka qalabka ku bartaan iyago isticmaala. Dadka waaweyn ee la shaqeeya ilmaha ayaa tusa habka loo isticmaalo, oo tusaalo ahaan u tusa habka la isugu xira kelmadaha si ay ugu xiriiraan. Waxaa ilmaha dhiira geliya markey caadi ahaan wax u weydiistan oo aad uga jawaabto adigoo isticmaalaya qalabka.

## 3. Waqti hore bilow

Ha ka baqin in aad tijaabiso qalab isticmaalkiisu adagyahay. Sida caadiga ah ilmaha marka ay korayaan kumaan kun oo kelmadood bey maqlaan, dabadeed kelmadaha ay si ciyaar ah u yiraahdaan. Markey labo sano garaan, waxey isticmalaan dhawaaqyo badan, kelmado iyo iyagoo isku dhafan. Qalab isticmaalkiisu balaaran yahay waxuu ilmaha dib-udhaca leh siinaya fursad ay ku isticmaali karaan kelmado badan. Qalabyadaan intooda badan waxey leeyihiin hab aad ugu jilcin karto isticmaalkooda, oo ay ilmahu ula qabsan karaan hadba markey sii kobcaan oo xirfadooda iyo kalsoonidooda sii siyaado.

Hadaad xiiseyneyso in aad aragto qalabyadaan kala duwan ee diyaarka ku ah, la xiriir xarunta Simon Technology ee PACER Center [PACER.org/stc/library](https://www.pacer.org/stc/library). Xaruntu waxey leedahay nuucyo qalab tiro balaaran, oo aad ku arki karto bandhig amaba amaahan karto.

Niyad furan iyo rajo weyn u lahow ilmahaaga. Ilmaha dib u-dhaca xooggan leh waxey kordhisin karaan xirfado muhiim ah oo siyaadinaya kartidooda akhriska, qorista iyo hadal-xiriirkooda.